

Qorshaha lagaga hortegayo cunsuriyada

Gacaliye xannaaneeyayaal iyo waalidiin

Wasaaradda waxbarashada waxay diidaysaa dhammaan qaababka cunsuriyada oo dhan waxaana ka go'an ciribtirka dhammaan qaababka isir kala sooca gudaha dugsiyada dawlada NSW. Wasaaraddu [Anti-Racism Policy](#) (Qorshaha Lagaga soo Horjeedo Cunsuriyada) waxay ujeedadiisu tahay in la hubiyo inaan ardeyga, shaqaale, waalid, xannaaneeye ama xubin ka mid ah bulshada dugsiyada kala kulmin cunsuriyad degaanka dugsiyada.

Qorshuhu wuxuu weydiinayaa dhammaan xubnaha bulshada dugsiyada inay caawiyaan in laga hortago cunsuriyada iyadoo la muujinayo xushmada dhaqameed, luuqadeed iyo asalada diimeed ee dadka kale, iyo in loo dhaqmo siyaalo kor u qaadaya aqbalaada iyo wanaag ku wada joogida degaanka dugsiyada dhexdiisa.

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay Sarkaalka Xiriirka Ka Hortaga Cunsuriyada (Anti-Racism Contact Officer (ARCO)) oo u tababaran inuu ka caawiyo ka hortaga cunsuriyada iyo taageerida bulshada dugsiyada markay sameynayaan cabashooyin cunsuriyadeed oo dugsiyada dhexdiisa ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha iyo doorka ARCO eeg [Anti-Racism Policy - Information for parents and carers](#) (Macluumaadka - Qorshaha Ka Hortaga Cunsuriyada ee loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta).

Waa ku mahadsan tahay inaad naga caawisid ilaalinta jawi dugsiyeed wanaagsan oo dhammaan qaababka cunsuriyada laga diiday. Fadlan ila soo xiriir haddii adiga ama ilmahaagu aad la kulantaan nooc kasta oo ah cunsuriyad, oo aad aragto qof alaale qofkii ay ku heysato cunsuriyadi dugsiyeed, ama haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah ama taageero.

Waa daacadaadii

Maamulaha

Caawimaada turjumaanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad dugsiyada la hadasho ama inaad ballan ka sameysatid xubin shaqaalaha ka mid ah fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka dugsiyada ka dibna xiriiriyaha ayaa wici doona dugsiyada oo khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiya wadda hadalkaaga dugsiyada.

Adeegga turjumaanka lacag lagaama qaadi doono.